

HAWSHA WAXBARASHO EE GAARKA AH

Ilmahaaga maqabaa wax caqabad waxbarasho? Ilmahaaga dhibaatooyin makuqabaa kuwaasoo kahor istaagaaya waxbarashada? Lahadal macalinka ilmahaaga ama shaqaalaha kale ee iskuulka jooga kuwaasoo gacankagaysan kara nooca caawin ee loo baahanyahay. Kadib marka laysku dayo dhamaan caawinta fasalka dhexdiisa ah, waxay noqonkartaa waqtigii waxbarasho gaar ah la geeyn lahaa.

Talaabada 1 – Gudbin

Hadaad kawalwalsantahay shaqada ilmahaaga ee iskuulka waxaad dalban kartaa qiimaynta qusaysa awoodooda iyo baahiyahooda.

- Tan waxaa ladalban karaa waqti kasta adoo samaynaaya qoraal aad udirto Gudiga Waxbarashada Gaarka ah ee Iskuulka kahor (CPSE, da'da 3-5).
- Ama Gudiga waxbarashada Gaarka ah (CSE, da'da 5-21). Gudiga Waxbarashada Gaarka ah waxaa kamida **waalidiinta caruurta**, Macalimiinta Waxbarashada Gaarka, macalimiinta waxbarashada tooska ah iyo shaqaalaha kale.
- Hayso koobiga codsiga.

Talaabada 2 – Qiimaynta Shaqsiga

Iskuul wuxuu dhamaystirayaa qiimaynta awoodaha iyo baahiyaha ilmaha si loo fiiriyo in adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ay caawinkarto.

Talaabada 3 – Kago'aan gaarida Uqalmida Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah

Kadib marka ladhameeyo qiimaynta ilmaha, CPSE ama CSE ayaa kashiraaya go'aaminta nooca adeegyada Waxbarashada Gaarka ah. ee ilmahaaga caawin karta

Talaabada 4 – Barnaamijka Waxbarashada Shaqsiga ah (IEP)

Marka ilmahaaga uu xaq uyeesho adeegyada Waxbarashada Gaarka ah, Gudigu waxay abuurayaan Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP).

EP waa dukumiinti kaasoo qeexaya tayada ilmaha iyo taageerada iyo Adeegyada uu/ay helayso iyo yoolalka sanadka.

Talaabada 5 – Dib u eegida/Dib uqaymaynta

- Gudiga waa inay dib u eegaan IEP ugu yaraan halmar sanadkii (Dib u eegista sanadlaha ah) si loo firsho hadii yoolalka lagaaray iyo hadii hormar lasameeyay.
- Ilmaha waa in si rasmi ah dib loogu eegaa; si kasta hanoqotee barnaamijka waxaa dib loo egi karaa xili kasta.



Sharciga Dadka aan waxbarashada Xubnhooda dhamaystirayn (IDEA) ayaa Aqalka hoose ansixiyay saanadkii 1975 si loo hubiyo il caruurta xubnaha la' ay uheleen fursad waxbarasho dawladeed oo lacag la'aan ah oo sax ah, si lamida ilmaha kale.

8.4% oo arday ayaa helay adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ay bixiso IDEA.

63.8% ee ardayda da'doodu udhaxayso 14-21 kuwaasoo ubagay IDEA/sadeegyada waxbarashada gaarka ah oo 2010-2011 qaatay shahaadada diplomada.

Waalidiinta waxay qayb aad muhiim ah uyihiin talaabo kasta oo hawsha ah Kaqayb qaadashada waalidka si wayn ayaa loo doonayaa.

Tixraacyada iyo macluumaadka uu bixiyay;
-specialeducationadvisor.com
-futureofchildren.org
-disabilitycompendium.org
Visit parentnetworkwny.org for more info.

Waxyaalaha kujira dukumiintigaan waxaa lagu sameeyay deeq kalimid Waaxda Waxbarashada Marakanka, #H325160003. Hase yeeshee, waxyaabahaas muhiim maaha inay matalaan siyaasada Waaxda Waxbarashada Maraykanka, ummaane qaadan kartid in dawlada dhexe kugu taageerto. Madaxda Mashaaricda, Carmen Sanchez.

